# Dhibaatooyinka Dayactirka ee Degdegga Ah

Emergency Repair Problems

## Waa maxay dayactirka degdegga ah ee dhibaatooyinka?

Dayactirka degdegga ah ee dhibaatooyinka waa marka aadan heysan:

- Biyaha
- Biyo kulul
- Kuleyl
- Makiinadda cuntada lagu karsado
- Koronto
- Musqul aad isticmaasho
- Adeegga aasaasiga ah ama dhismayaasha sida albaabka hore ama dambe oo maqan, ama daaqad maqan.

Guri dhaqan ka bax ah ama ogeysiis looga dhigayo dhaqan ka bax waa xaalad degdeg ah, maadaama ay taasi ka dhiagn tahay guriga oo dhan in aan lagu noolaan karin. Amar kasta oo uu soo saaro kormeeraha magaalada uu ku marayo in laga guuro hoyga aad degan tahay waa xaalad degdeg ah, oo ay kamid tahay haddii ay ka mid tahay maadaama uusan kireeyuhu heysan ogolaashaha kirada.



## Maxaan yeelayaa?

La socodsii kireeyaha markiiba. Haddii aanu kireeyuhu dooneyn inuu sameeyo dayactirka ama hagaajiyo xaaladda degdegga ah, waxa aad maxkamadda ka diiwaan gelin kartaa **Talaabada Degdegga Ah ee Looga Daayo Kireystaha (ETRA)**. ETRA waxaa kale oo lagu magacaabaa talaabada degdegga ah ee hawsha looga daayo. Waxaa wanaagsan in aad leedahay qareen ku caawiya si aad u diiwaan geliso ETRA laakiin kaligaa waad qabsan kartaa. La soo xiriir xafiiska degaankaaga ee gargaarka sharciyada si ay kuu caawiyaan ama kuula taliyaan.

## Sidee Ayaan u Diiwaan Geliyaa Talaabada Degdegga Ah ee Looga Daayo Kireystaha (ETRA)?

Si aad u diiwaan geliso hubi in aad sameyso waxyaabaha soo socda:

- Buuxi foomka halkan ku lifaaqan. Waxaa kale oo aad foomkan aad ka heli kartaa maxkamadda.
- Waa in aad wargelisaa kireeyaha 24 saac ka hor inta aadan ka diiwan gelin maxkamadda.
- Haddii aadan la xiriiri karin kireeyaha, fariin u dhaaf si aad u gaarsiiso ogeysiiska 24ka saac.

- Ogeysiiska 24ka saac, wargeli kireeyaha xaaladda degdegga ah ee ka jirta guriga oo aad dooneyso in la hagaajiyo 24 saac gudahood ama aad diiwaan gelineyso ETRA. **Waa muhim in aad gaarsiiso kireystaha in aad maxkamadda ka diiwaan gelin doonto.**

- Haddii aanu kireeyuhu waxba ka qaban xaaladda degdegga ah 24 saac gudahood marka aad gaarsiiso ogeysiiska, waxa ad maxkamadda u gudbin kartaa ETRA?

- Haddii aad isku daydo in aad la xiriirto kireeyaha si aad u gaarsiiso ogeysiiska 24ka saac ah, laakiin aadan helin, waa in aad maxkamadda ka diiwangelisaa.

Lacag ayaa lagaa doonayaa si aad uga diiwaan geliso maxkamadda.. Haddii uu dakhligaagu yar yahay, waxa aad buuxin kartaa foomka (IFP) oo codsan kartaa in lacagta diiwaangelinta lagaa daayo. Foomkaas maxkamadda ayaad ka heli kartaa mid kala soo bax barta internetka adiga oo ka jawaabaya su'aalaha www.lawhelpmn.org/forms. *(ingiriisi kaliya)*

 → Guji *Court Fee Waiver (IFP)*

La imoow cadeyn muujineysa in dakhligaagu yar yahay, qeybta dambe ee jeegga mushaharka, ama cadeyn muujineysa gargaarka aad dawladda ka qaadato.

Marka aad ETRA codsato, waxa aad codsan kartaa in dhageysiga maxkamadda degdeg loo qabto, inta badan 3-7 cisho oo maalmaha shaqada ah. Waxa ay u badan tahay in maxkamaddu amarto in kirteeyuhu dayactirka sameeyo, loona qabto balan kale oo looga hadlo kirada iyo lacag magdhaw ah dhibaatada ku gaartay.



## Maxaan weydiisan karaa in maxkamaddu amarto?

Waxaa kale oo maxkamaddu weydiisan karaa in ay amarto:

- In kireeyaha la amro inuu dayactir sameeyo markiiba.
- Inuu kuu ogolaado inaad dayactirto oo kirada aad ka jarato.
- In qof kale dayactirka sameeyo oo maamulo guriga.
- Kirada yareeyo ilaa dayactirka laga saeeyo.
- In kireeyuhu bixiyo kharashka hoteelka, ama dib kaa siiyo haddii aad dooneyso in aad qof kale la degto.
- In kireeyuhu ku dayo meel kale aama uu kharashka aad meel kale ugu guurto.

Maxkamadda waxa aad weydiisan kartaa magdhaw lacageed lagaa siiyo dhibaatada ku gaartay. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in lacag lagaa siiyo waxyaabaha ay ka mid yihiin:

- Laguu soo celiyo lacagtii aad ku bixisay kirada intii ay dhibaatadan socotay.
- Kharashka qareenada.
- Lacagta kaa duntay dhibaatada kugu dhacday darteed, sida in aad meel kale degto. Keen cadeynta, sida lacag qabashada ama jeeggaga aad lacagta ku bixisay.

*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2022 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**

**STATE OF MINNESOTA** **DISTRICT COURT**

**COUNTY OF** ______________________ ______________________ **JUDICIAL DISRICT**

______________________________
**Plaintiff (tenant)**

**vs.**

______________________________
**Defendant (Landlord)**

**EMERGENCY TENANT**
**REMEDIES ACTION PETITION**
Minn. Stat. 504B.381

**FILE NO:**

Plaintiff states under oath:

1) My address is ______________________________________________

2) My landlord's name is ______________________________________

3) My landlord's address is ____________________________________

4) The monthly rent is $ ____________

5) ¨ I notified the landlord that I was filing this action at least 24 hours before I filed.

**or**

¨ I tried to notify the landlord that I was filing this action by: ________________

______________________________________________________________

6) I have an emergency involving the loss of running water, hot water, heat, electricity, sanitary facilities, or other essential services the landlord is responsible for. My emergency is:

______________________________________________________________

______________________________________________________________

7) Besides the emergency, my rental unit also has the following repair problems:

______________________________________________________________

______________________________________________________________

______________________________________________________________

______________________________________________________________

8) I respectfully ask the court to issue an order including the following:

a. Order the landlord to take care of the emergency right away.

b. Set a hearing to check on the landlord's compliance with this order and to consider this other relief:

i. Give me a refund of rent I paid to cover the time period of the emergency.

ii. For any repairs the landlord doesn't get done by the court's deadline, fine the landlord as provided in MN Statute Section 504B.391.

iii. Order the landlord to make all the other necessary repairs.

iv. Lower my rent to $ ___________ per month until the month after all the repairs are done. For any repairs that the landlord does not get done by the Court's deadline, authorize me to pay for the repairs myself and take it off future rent.

v. Enter a judgment in my favor for $ ___________ to compensate me for rent paid while there were repair problems, including attorney's fees. Let me collect the judgment by taking it off my rent.

vi. If I am forced to move, order the landlord to put me into another apartment or to pay for temporary shelter and moving costs and to return my security deposit right away.

vii. Other:

_____________________________________________

_____________________________________________

9) To the best of my knowledge, I am not filing this case for an improper reason, such as harassment or delay; my claims are supported by the law, and there is evidence for them. I know that I can be fined or sanctioned by the court if this statement is false.

**I declare under penalty of perjury that everything I have stated in this document is true and correct.**

Dated: ______________________ ______________________________

*Signature*

Name: ______________________________

Address: ______________________________

City, State, Zip: ______________________________

Phone: ______________________________

E-mail: ______________________________